

UJEEDO: HESHIIS KALA GADASHO NUS BOOS GURI JIINGAD BACWEYNE UU KA DHISAN YAHAY.

Maanta oo ay taariikhdu tahay **31/05/2022**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheyne ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iyyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

<p>ISKA IIBIYE:- Xasan Carabow Axmed Maxamed, Hooyo: Faadumo Maxamuud Axmed, Somali ah, Ku Dhashay: Balcad, Sanadkii: 1971, Degan Muqdisho, La Sawiray D-MAAL IYO D-AQOON:- C/llaahi Maxamed Jeyte (Simba), Somali ah, Degan Muqdisho, Sita: W.A, Lr. 000152374</p>	<p>IIBSATO:- Huda Mohammed Gama, Hooyo: Sucaad C/llaahi Axmed, Somali ah, Ku Dhalatay: Somalia, Sanadkii: 1997, Degan USA. WAKIILKA IIBSATADA:- Axmed C/llaahi Axmed, Somali ah Degan Muqdisho.</p>
<p>TILMAAMAHA GURIGA LA KALA IIBSANAAYO Guri Dhisan oo Ku yaal: Muqdisho, Degmada: (Hodan), (Gaar ahaan Gofka Reer Axadow) Cabirka: (10X15)M Looto No: 0597-F3, W.M.L: (10238/2016), Tr. 27/11/2016, Kana Soo Baxay Nootaayo Muqdisho, Uuna Saxiixay Dr. Maxamed Cali Nuur (Socdaal)</p>	<p>SOOHDINTA GURIGA Bari: Dhul dad, Koonfur: Dhul dad, Galbeed: Jid, Waqooyi: Dhul dad Ahna Nuska Xiga Koofur QIIMAHA GURIGA: USD \$10,000 (Toban Kun Oo Doolarka Mareykanka ah).</p>

B- Aniga oo ah **XASAN CARABOW AXMED MAXAMED**, Waxaan qoraalkaan ku cadaynayaa aniga oo maskax ahaan iyo Jir ahaanba ka fiyoow in aan ka gaday kuna wareejiyey **HUDA MOHAMMED GAMA** Nus booskayga dhisan oo tilmaamihiisu sare ku xusan yahay, Waxaan kale oo aan Cadaynayaa in gurigaan uu ka madax banaan yahay rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale, iyo wax kasta oo horjoogsan kara heshiiskan, Sidaas daraadeed Wixii Ceebaal ah, ee Ka Yimaada Gurigaan Sida Danguud, Dukuminti Ka Horeeyey dukumintigaan, dukuminti been abuur ah, ama Duris Sharci iyo Wixii La Mid ah aniga ayaa Mas'uul Ka ah, Waxaa Ka Dhisan Sadex Qol&Jiko iyo Musqul Oo Wareegooda Jiingad ah, Waxaan Kale oo Cadeynayaa in aan Qaatay Dhamaan Lacagta Sare Ku Xusan.

T- Aniga oo ah **C/LAAHI MAXAMED JEYTE (SIMBA)**, Waxaan Cadaynayaa in aan Damiinu Aqoon ka ahay Iska iibiyaha Lagu Magacaabo **Xasan Carabow Axmed Maxamed** Isla Sido Kale aan Damiinu Maal ka ahay Guriga Sare ku Xusan iyo Iska iibiyaha Isla markaana aan Anigu Bixin doono Qiimigii lagu gaday Gurigaan hadii wax Ceebaal ah ay ka yimaadaan.

J- Aniga oo ah **AXMED C/LAAHI AXMED** Ahna Wakiilka Iibsatada gurigaan, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan u Gudoomay Iibsatada Milkiyada Gurigaan una Saxiixay Beecaan.

X- ASALKII HORE: Xuseen Axmed Maxamuud RL:- 27186, Tr. 26/08/2004, Sabarlog No: 213/36/2004, Tr. 28/08/2004, Kana Soo Wada Baxeen D/Hoose ee Ee Muqdisho Cabirka (20X15)-M Looto No 0597-F3.

SAXIIXA ISKA IIBIYAHA GURIGA

XASAN CARABOW AXMED

SAXIIXA DAMIINKA

C/LAAHI MAX/D JEYTE (SIMBA)

SAXIIXA WAKIILKA IIBSATADA GURIGA

AXMED C/LAAHI AXMED

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- MAXAMED CUMAR CARABOOW

2- C/LAAHI KHALIIF DHOORE

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 192/T.P.N/22, Tr. 31/05/2022, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **Xasan Carabow Axmed Maxamed Ahna (Iska iibiyey)**, 2- **C/llaahi Maxamed Jeyte (Simba) Ahna (Damiinu-Maal Iyo Damiinu Aqoon)**, 3- **Axmed C/llaahi Axmed Ahna Wakiilka Iibsatada** iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Beecaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

NOOTAAYAHA

✓ Sayid



Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"

XASAN CARABOOW AXMED




WAK/AXMED C/LAAHI AXMED



DAMIIN C/LAAHI MAXAMED JAYTE



MAXAMED CUMAR CARABOOW



C/LAAHI KHALIIF DHOORE



JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال

SOMALI REPUBLIC




WARQADDA AQOONSIGA

البطاقة الشخصية

000152374

IDENTITY CARD



Magaca / الاسم / Name

**ABDULLAHI
MOHAMED JEYTE**



Taarikhda dhalashada / تاريخ الميلاد / Date of Birth

07 FEB 1972

Meesha dhalashada / مكان الميلاد / Place of Birth

EL-DER

Taarikhda la bixiyay / تاريخ الإصدار / Date of Issue

27 OCT 2013

Lab/Dheddig / الجنس / Gender

MALE





ORIGINAL

XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO PUBLIC NOTARY



HESHIIS KALE DASHA DHUL BANAAN

L10238/2016 Tr.27/11/2016

Sanadka Labada kun lix iyo Tobanka Maalinta 27-ka Nofeembar 2016 (27/11/2016) Anigoo ah Dr. Maxamed Cali Nuur (Socdaal) Xafiiska Nootaayaha Muqdisho, Xafiisna ku leh Wadada H/wadaag ee Degmada H/wadaag inta u dhaxeysa Shirkadda Isgaarsiinta SomTel iyo Shirkadda Xawaalada Dahabshiil waxaa iigu yimid iyagoo heshiis ah dadka kala ah:

1) Cusmaan Xuseen Axmed Maxamuud(ina Axadow) ina Aamina Cali Xasan ku dhashay Xamar Sanadkii 1995 degan Degmada Hodan sawirkiisuna kudhaganyahay aatadaan dusheeda ahna iskagade uuna damiinu maal iyo damiino aqoonsi kayahay Aweys Cumar Ibraahim ina Xaliimo Muxumad lehna P.T.E.15454/2016/Xamar, 2) Xasan Carabow Axmed Maxamed ina Faadumo Maxamuud Axmed ku dhashay Balcad sanadkii 1971 degan Degmada wadajir ahna iibsade, ayna usaxiixday Suldaano Cali Boolow.....Ugu horeyn dadkaasi waxay i weydiisteen in aan u kala qoro heshiis ku saabsan kalagadasho dhul ku yaal degmada Hodan lehna W.M.L.08677/2015 Tr.11/4/2015, kana soo baxday Xafiiska Nootaayaha Muqdisho uuna saxiixay Dr. Maxamed Cali Nuur (Socdaal) Lotto L.0597/F3, cabirkiisuna dhan yahay (20X15M) ahna dhul banaan soohdimihiisuna kala yihiin: Galbeed jid=====, Waqooyi jid =====, Bari dhul dad, Koofur dhul dad,, Cusmaan Xuseen Axmed Maxamuud (ina Axadow) wuxuu qoraalkaan ku cadeynayaa in uu ka iibiyey kuna wareejiyey Xasan Carabow Axmed Maxamed dhulkiisa banaan oo ku yaal degmada Hodan cabirkiisuna dhan yahay (20X15M), Lotto L.0597/F3, Galbeed jid Waqooyi jid inta kalana dhul dad, sidaa darteed milkiyadii dhulkaas waxay ku wareegtay ninka iibsaday oo ah: XASAN CARABOW AXMED MAXAM ED , Cusmaan Xuseen Axmed Maxamuud(ina Axadow) wuxuu kaloo qoraalkaan ku cadeynayaa in dhulkaasi uu iska iibiyey ka madax banaan yahay rahan iyo sheegasho dad kale waxayna ku heshiiyeen oo ku kala iibsadeen lacag dhan U.S.\$ 4,800/=(AFAR KUN IYO SIDEED BOQOL OODOOLAR AMEERIKAAN AH) oo gacanta laga saaray iskagadaha, wixii ka yimaada milkiyada dhulkaasi oo sheegasho dad kale ah waxaa mas'ul ka ah iskagadaha wixii aan ku xusneyn halkaan waxaa loo raacayaa sida uu qabo sharciga Jamhuuriyadda Soomaliya, heshiiskaasina sidaasi ayuu ku dhamaaday markii ay aqristeen dhinacyadu oo ay wada fahmeen ayeyna halkaan hoose wada saxiixeen.

Dhulkaan oo leh Nullo ooste L.10082/2016 Tr.29/11/2016 kana soo baxday wasaarada maaliyada waaxda canshuuraha beriga.

Iskagade: Cusmaan Xuseen Axmed Maxamuud(ina Axadow) _____
Wakiil iibsade: Suldaano Cali Boolow _____
Marag Cabdi Maxmed Xuseen (Booto) _____
" " : Maxmed Yuusuf Cali Boolow _____
" " : Axmed Maxamuud Nuur _____

D/aqoonsi iyo Damiinu Maal :Aweys Cumar Ibraahim



Dr. Maxamed Cali Nuur(Socdaal)

Wadaad Waaw
Gohi Waaw
Coo Naqo Waaw


Becc

R: 192/T.P.N/22

Tr: 8/05/2022

10x15-M

U: 0597-F3



Dawladda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Gaadiidka



Federal Republic of Somalia
Ministry of Transportation

Aqoonsiga Dereewalka | Driving License



Aweys Cumar Ibrahim

L/Aqoonsiga - License No

15454

Magaca - Name

Aweys Cumar Ibrahim

Iinsiyadda - Nationality

Somali

Taariikhda Dhalashada - Date of Birth

01/01/1985

Meesha laga Bixiyey - Place of Issue

Muqdisho

Heerka Gaadiidka - Vehicle Type

D

Taariikhda La Bixiyey - Issued Date

06/01/2016

Taariikhda uu Dhacaayo - Expiry Date

06/01/2019





210238/16 27/11/16

DOWLADDA HOOSE EE G/BANAADIR

Lacag Qabasho Guud

5639

Taariikh: 29/11/16

Mudane: Nasan Cayado Ahmed

Lacag Dhan: Sh.So US\$

Qoraal ahaan: Koorta Deot Kadye

Sabaabta: Diwan Juh Dhal

Qabtaha



Saxiixa Lacag Qabtaha

[Signature]

RECEIPT

Date 29/11/2016

No. RCT-8308-
2016


Received From CUSMAAN XUSEEN AXMED Amount \$ 97.92

For Payment of TRS-8278-2016

Received By nimcaale Paid By Cash

PAID

Tax Amount	\$96.00
Stamp Duty	\$1.92
Total Amount	\$97.92



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMALIYA
Wasaaradda Maalyadda
Waaxda Canshuuraha Barriga
WARQADDA RUQSADA GADIDDA HANTIDA

TIRSI #:10082



Waaxda Canshuuraha Barriga ee Wasaaradda Maalyadda waxey ruqseysaywareejinta hantida ay faahfaahinteedu hoos ku xusan tahay:

NOOCA HANTIDA MA GUURTADA AH :

DHUL BANAAN

LOT NUMBER

0597/F3

TITLE DEED NO.

WML 08677/2015 TR.
11/4/2015...

DEGMADA

HODAN

CABIRKA

20X15

CIDDA WAREEJINEYSA

CUSMAAN XUSEEN AXMED

CIDDA LAGU WAREEJINAYO

XASAN CARABOW AXMED

NOTARY

SOCDAAL

NOTARY REF

10238/2016..

QIIMAHA LAGU KALA GATAY

\$4,800.00

Taariikda la bixiyey:

11/29/2016 6:54:15 AM

Waaxda Canshuuraha Barriga

Aspose



TRS-8278-
2016



NOOTAAYAHA DR. SOGDAAL MUQDISHO
DR. SOGDAAL PUBLIC NOTARY

HESHIIS WAREEJIN DHUL BANAAN

L.08677/2015

Tr.11/04/2015

Sanaadka Labada kun Shan iyo Tobanka Maalinta 11-ka Abriil 2015 (11/04/2015) Anigoo ah Dr. Maxamed Cali Nuur Xafiiska Nootaayaha Muqdisho, Xafiisna ku leh Wadada H/wadaag ee Degmada H/wadaag inta u dhaxeysa Shirkadda Isgaarsiinta SomTel iyo Shirkadda Xawaalada Dahabshiil waxaa iigu yimid iyagoo heshiis ah dadka kala ah:

1) Cumar Ibraahim Nuur Tifow ina Aamino Xasan Cali ku dhashay Xamar 1934 degan Degmada Hodon Garasbaaley sawirkiisuna ku dhagan yahay aatadaan dusheeda lagana yaqaan Xafiiskaan ahna Wareejiye, sitana dhaxalkoob, Qayim iyo Wakaalad Guud L.419/2015 Tr.6/4/2015 kana soo baxday Maxkamadda Degmada Waaberi uuna saxiixay Garsoore Dr. Cabdikariin Cumar Calasow iyo Kaaliye Cabdulqaadir Cabdulle Nuur...2) Cusmaan Xuseen Axmed Maxamuud ina Aamino Cali ku dhashay Xamar 1995 degan Degmada Hodon ahna lagu wareejiye, uuna u saxiixay Salaad Cali Axmed.....Ugu horeyn dadkaasi waxay i weydiisteen in aan u kala qoro heshiis ku saabsan wareejin saami dhaxal dhul ku yaal degmada Hodon lehna W.L.Q.27066 Tr.26/8/2004 W.L.DH.B/B/211/16/2004 Tr.28/8/2004 kana soo baxday D.H.X Lotto L.0472/F3, cabirkiisuna dhan yahay (20X15M), W.L.Q.27186 Tr.26/8/2004 W.L.DH.B/B/213/36/2004 Tr.28/8/2004 kana soo baxday D.H.X Lotto L.0597/F3, cabirkiisuna dhan yahay (20X15M) isku darkooduna yahay (20X30M) ahna dhul banaan soohdimihiisuna kala yihiin: Waqooyi jid=====, Galbeed jid=====, Koofur dhul dad, Galbeed dhul dad, Cumar Ibraahim Nuur Tifow wuxuu qoraalkaan ku cadeynayaa in uu ku wareejiyey Cusmaan Xuseen Axmed Maxamuud saamigii dhaxal ee ay ku laheyd dhulka uu ku qoran yahay Marxuum Xuseen Axmed Maxamuud oo ku yaal degmada Hodon cabirkiisuna dhan yahay (20X30M), Lotto L.0472, 0597/F3, sidaa darteed milkiyadii dhulkaas waxay ku wareegtay Ninka lagu wareejiyey oo ah: CUSMAAN XUSEEN AXMED MAXAMUUD, Cumar Ibraahim Nuur Tifow wuxuu qoraalkaan ku cadeynayaa in dhulkaas uu iska wareejiyey ka madax banaan yahay rahan iyo sheegasho dad kale, wixii ka yimaada milkiyada dhulkaasi oo sheegasho dad kale ah waxaa mas'uul ka ah iska wareejiyaha, wixii aan ku xusneyn halkaan waxaa loo raacayaa sida uu qabo sharciga Jamhuuriyadda Soomaliya, heshiiskaasina sidaasi ayuu ku dhamaaday markii ay aqristeen dhinacyadu oo ay wada fahmeen ayeyna halkaan hoose wada saxiixeen.

Wareejiye: Cumar Ibraahim Nuur Tifow _____

Marag: Xasan Cali Maxamed (Geel) _____

" : Salaad Cali Axmed (Goofleey) _____

NOOTAAYAHA
Dr. Maxamed Cali Nuur (Soedaal)

1283 10238/0/6

18-27/11/0/6
20A15

2.05477/3

Maxkamadda Degmada Waaberi

WAKAALAD GUUD IYO QAYIM

L.419/2015

Tr.06/04/2015

Waxaa Maxkamadda hor yimid Cusmaan Xuseen Axmed Maxamuud ina Aamino Cali Xasan ku dhashay Xamar 1995 degan Degmada Hodon sawirkiisuna ku dhagan yahay aatadaan dusheeda uuna damjiin aqoonsi ka yahay Salaad Cali Axmed (Goofleey) ina Xaliimo Abuukar lehna Baasaboora No.P00117063/Soomaaliya, waxa uuna Maxkamadda ka codsatay in loo sameeyo dhaxalkoob ku saabsan geerida Aabihiis Marxuum Xuseen Axmed Maxamuud waxayna Maxkamadda ka codsatay in uu keeno markaatiyaal u suga geerida Marxuumkaas una cadeeya, wuxuuna Maxkamadda horkeenay labada marag ee kala ah: 1)Salaad Cali Axmed (Goofleey) ina Xaliimo Abuukar ku dhashay Xamar 1952 degan Degmada Hodon lehna Baasaboora No.P00117063/Soomaaliya, 2)Xasan Cali Maxamed Nuur (Xasan Geel) ina Khadiijo Xuseen ku dhashay Xamar 1949 Degan Degmada Hodon lehna Baasaboora No.A0321081/Soomaaliya, waxayna si wadajir ah u cadeeyeen una sugen in uu geeriyooday Marxuum Xuseen Axmed Maxamuud sanadkii 2013 kuna geeriyooday Xamar Degmada Hodon kana tagay dhaxaltooyo ka kooban:

1. Cusmaan Xuseen Axmed 20 jir ah, ahna wiilkiisii.
2. Liibaan Xuseen Axmed 13 jir ah, ahna wiilkiisii.
3. Xaawo Xuseen Axmed 24 jir ah, ahna gabadhiisii.
4. Xamdi Xuseen Axmed 18 jir ah, ahna gabadhiisii.
5. Hidaayo Xuseen Axmed 16 ah, ahna gabadhiisii.
6. Xabiibo Xuseen Axmed 7 jir ah, ahna gabadhiisii.
7. Aamina Cali Xasan 40 jir Xaaskii Marxuumka.

Maragu waxa kale oo ay cadeeyeen in Marxuumka labadiisii waalid ka geeri horeeyeen, cid kale oo dhaxalkiisa wax ku lehna aysan jirin, wuxuuna ka tagay tarako dhulal banaan iyo Guryo dhisan oo ku yaala Degmooyinka Gobolka Banaadir iyo dhulal kale oo banaan oo ku yaala Degmada Afgooye Deegaanka Ceelasha-Biyaha, Caruurta ka yar da'da Qaangaarka waxaa qayim looga dhigay hooyadood Aamina Cali Xasan, dhamaan dhaxaltooyada oo dhan waxay wakiisheen Xaaji Cumar Ibraahim Nuur waxayna u wakiisheen Saamiyada ay ku leeyihiin Marxuum Xuseen Axmed Maxamuud gaar ahaan dhulka banaan iyo guryaha ku yaala Degmooyinka Gobolka Banaadir iyo wax allaalla wixii uu ku qoran yahay Marxuum Xuseen Axmed Maxamuud, waxayna awood u siiyeen in uu u gadi karo, hibeyn karo, u dacwoon karo, rahmi karo, iibin karo, qareen u qaban karo haddii loo baahdo, la wakiishuhuna waa aqbalay wakaaladaasi, waana dhaxalkoob, Wakaalad iyo Qayim ansax ah oo waafaqsan shareecada Islaamka iyo qaanuunka dalka u dagsan waxaana lagu qoray diiwaanka mucaamalaadka Maxkamada.

Dalbade: Cusmaan Xuseen Axmed *CUSMAAN XUSEEN AXMED*

Suge: Salaad Cali Axmed (Goofleey) *Self* *Cali X*

" ": Xasan Cali Maxamed (Geel)

Wakiishayaal:

1)Aamina Cali Xasan

2)Xaawo Xuseen Axmed

3)Xamdi Xuseen Axmed

4)Hidaayo Xuseen Axmed

La Wakiishe: Xaaji Cumar Ibraahim Nuur

Kaaliyaha Maxkamadda Cabdulqaadir Cabdulle Nuur

Garsooraha Maxkamadda Degmada (Dr. Cabdikarim Cumar Calasow)





740 / 1000 H-01234
**DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
WAAXDA DHULKA**

20X15 27186 0.0597 1/3

Xaashida lacag Qabashada No.: _____

Mud / Mar. Muuse Ahmed Hassan

Waxaan ka qabtay Sh. So. 300,000 So. Sh.

oo ah 200,000 So. Sh.

Muqdisho Muuse Ahmed Hassan

B-Qofka Lacagta Bixiyay
T-Maamulka Lacagta
J-Nuqul ku haraya Boloogga





**DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
WAAXDA DHULKA**

No.: **27186**

Soc. Jelidda Warqadda

Tirsi :

Taariikh :

27186
28-8-2004



Bollettario No.:

Bolletta No. :

Sannadka :

213
36
2004

WARQADDA LAHAANSHAHA DHULKA

Mud / Mar.:

Xuseen Axmed Max'ed

Og.: Tal. Ciidaanka Boliska Dawladda Hoose Muqdisho

- Xamar.

Mudanaha / Marwada kor ku qoran waxaa loo oggolaady inuu / iney dhisto Cariish, Baraako ama

Guri Dhagax ah

20 X **15**

oo uu ka dhiso cad dhul ah oo

le'eg

Demo-Guri

kuna yaal Xaafadda **Hoden**

Soohdintiisuna tahay

P-0597-E

X. Wqooyi

X, Galbeed

X, Bari

iyo Koofur

Warqaddaan xaq waxaad ugu leedahay muddo laba iyo toban (12) bilood ah oo maanta

Ka billaabmanta, fasax la'aan inaad dhulka dhistid.

Warqadda lacag qaabashada No.

27186

ee

26-8-2004

Muqdisho, Taariikh

28-8-2004

Agaasimaha Waaxda Dhulka

[Signature]



Duqa Magaalada

[Signature]



DAWLADDA HOOSE EE MUDISHO
WAAXDA DHULKA

52186

513
30
5024

Rep 097701X
to 11-11-018

51K0
67-0997-018

Mud. Max. Xuseen
Op. Tal. Ciidamka
Mud. Max. Xuseen
Op. Tal. Ciidamka
Mud. Max. Xuseen
Op. Tal. Ciidamka

52186
50-8-0004



Handwritten signatures and official stamps at the bottom of the document.




FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 08/06/2022

Aniga oo ah **Sayidcumar C/llaahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Bashiir Cabdi Xasan** oo ka Wakiil ah Iibsato **Huda Mohammed Gama** Dukumiintiga **Original** Beeca Guriga ee **Rep No. 192/W.P.N/22, Tr. 31/05/2022**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca Iibsatada	Huda Mohammed Gama
Cabirka	10X15
Ku Yaallo	Muqdisho, Degmada Hodan
Lotto Lambar	0597-F3
W.M.L	10238/2016, Tr. 27/11/2016 Ka soo baxday Nootaayo Muqdisho
Taariikhda Beeca	31/05/2022
La Socoto	<input checked="" type="checkbox"/> Wasaarada Maaliyadda <input checked="" type="checkbox"/> Dowladda Hoose

Wakiilka Iibsato: Aniga oo ah **Bashiir Cabdi Xasan**,
Leh Tel No. **0616664618**, Degan **Y/shiid** Waxaan Halkaan
ka Cadeynayaa in aan ka Qaaday Xafiiska **Nootaayaha**
Waddani Dukumiintiga Guriga faah faahintiisu Sare ku
cadahay ayna leedahay **Huda Mohammed Gama**.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Sayidcumar C/llaahi Maxamed

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Bashiir Cabdi Xasan

Bashiir Cabdi Xasan

Sayidcumar C/llaahi Maxamed